# Siddee ayaan uga heli karaa qof i haya oo PCA ah barnamaijka Gargaaradda Koowaad ee Beesha iyo Adeegyadda (CFSS)

**Can I get a PCA from the Community First Supports and Services (CFSS) program**

## Waxa aan maqlay in barnaamijkii PCA uu isbedelay. Siddee ayuu uga duwan yahay siddii hore?

Waaxda Adeegyadda Bulshada ee Minnesota (Minnesota Department of Human Services) (DHS) waxa ay ka bedeshay magacii barnaamijka oo horey u ahaa Barnaamijka Gargaarka Daryeelka ee Shakhsiyanka ah (PCA) oo waxaa loo bixiyey Barnaammjika Gargaaradda Koowaad ee Beesha iyo Adeegyadda. CFSS waxa uu leeyahay adeegyo la mid ah kuwii PCA laakiin waxa uu leeyahay oo kale xulasho iyo adeegyo ka badan kuwii hore. Laakiin waxyaabo badan waa isla siddii, sidda:

- xaq u yeeladka iyo hababka dib u eegida
- adeegyadda la bixiyo ee hawlaha gargaarida nolol-maalmeedka (ADLs),
- xarakaadka aaladaha u baahan ee nolol-maalmeedka (IADLs) (oo ay ku jiraan gaari ku wadidu),
- hanaanadda caafimaadka la xiriira iyo hawlaha
- indho-indheynta iyo dib u saxida dabeecaha
- xaquuqdaadda racfaanka

Gargaarka daryeelka shakhsiyanka ah ee haynta wali waxaa loogu yeeraa PCA.

## Waa maxay Barnaamijka CFSS?

Barnaamijka Gargaaradda Koowaad ee Beesha iyo Adeegyadda (CFSS) waa magaca cusub ee Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Shakhsiyanka ah ee haynta (PCA). Waxa uu kugu siin adiga adeegyo guriga iyo beesha dhexdeeda haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo hawlaha aasaasiga ah ee maalin walba joogtadda ah. Kuwaas waxaa ka mid ah qubeyska, labiska, iyo in aad sariirta ka soo kacdo. Gargaaraha qof ahaaneed (PCA) qof loo tababaray in uu dadka ka caawiyo waxyaabaha aasaasiga ah.

Waxaa laga yaabaa in PCA uu ku caawin karo haddii aad tahay naafo jirka ama maskaxda ah ama aad qabto xanuun raagay ama dhaawac. PCA aad leedahay waxa ay kaa caawin kartaa in aad si madax banaan ugu noolaato gurigaaga halkii lagu geyn lahaa meel gurigaaga ka baxsan ama goobaha dadka lagu hayo.



## Ciddee ayaa ka heli karta adeegyo gargaar daryeel oo shakhsiyan ah oo hayn ah barnaamijka PCA?

Haddii aad lacag heysato waad iska bixin kartaa adeegga PCA, si ay kaaga caawiyaan hawl maalmeedka, iyo baahida kale ee guriga. Waxaa laga yaabaa in lagugu xiri karo adeegyada kale adiga oo la soo xiriira LinkAge ee 1-800-333-2433 ama Disability Hub MN ee 1-866-333-2466.

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha maaliyadda ama naafanimada ee barnaamijyada caafimaadka gobolka waxaa laga yaabaa in ay kaa bixiyaan adeegga PCA. Si aad u hesho barnaamijka caafimaadka gobolka oo kaa bixiya kharashka PCA, waxaa lagaa doonayaa:

- In aad ka diiwaangashan tahay Ceymiska Caaafimaadka Gobolka (MA), macaashka dheeraadka ah ee MinnesotaCare, Ceymis Kale (Alternative Care) ama cadeyn ah in lagaa dhaafay.
- In aad go'aan ka gaari karto daryeelkaaga ama uu jiro qof mas'uul kaa ah oo go'aanada kuu gaaraya.
- In aad degan tahay guri gaar kuu ah oo aan lagugu heyn guryaha dadka lagu hayo.
- In aad ka soo baxdo sharciyada qaarkood ee ku saabsan inta uu le'eg yahay daryeelka aad u baahan tahay.
- In aad hesho qiimeyn ay sameyso MNChoice si loo eego in aad xaq u leedahay adeegyadda iyo in kale

## Siddee u codsadaa?

La xiriir xafiiska adeegga dadweynaha si aad u ogaato sida qiimeynta loo balansado. La socodsii haddii aad u baahan tahay turjubaan.

Siddee ayaan sidoo kale uga heli karaa akhbaar iyo caawimaad Minnesota Aging Pathways ee 1-800-333-2433 ama Disability Hub MN ee 1-866-333-2466. Weydii waxyaabaha aad heli karto ee ku saabsan adeegyada PCA iyo sida loo qorto qof PCA kuu noqda.

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay maareynta daryeelka caafimaadka, sida Ucare, Medica amd kuwo kale, la xiriir oo weydiiso tilmaan iyo caafimaad.

## Qiimeynta


Qiimeynta waxaa lagu sameeyaa gurigaaga. Qiimeynta waxaa la sameeyaa marka ugu horeysa oo aad weydiisato PCA intaa wixii ka dambeeyana sanadkiiba hal mar. Haddii xaaladaadda caafimaad ay wax badani iska bedelaan ama haddii ay baahidaadda PCA du ay isbedesho xilliga sannadka gudihiisa ah, waxa aad weydiisan kartaa in qiimeynta horey loo sameeyo.

Qiimeyntu waxa ay qaadan kartaa dhawr saacadood.

## Waa maxay waxyaabaha ay i weydiinayaan xilliga qiimeynta?

Waxa ay ku weydiinayaan su’aalo ay wax kaga ogaanayaan xaaladaada:

- Haddii aad dooneyso qof kuu fidiya adeegga
- Haddii aad dooneyso in laga caawiyo hawlmaalmeedka
- daawadaada
- Caafimaadkaaga
- dabeecadaada



U sheeg qofka qiimeynta sameynaya waxyaabaha aad u baahan tahay ee lagaa caawinayo maalin kasta iyo waxyaabaha aad dooneyso in lagaa caaawiyo xilli kasta oo aad qabato. Ha xishoon. Waa inaad siiso akhbaar faahfaahsan oo ku saabsan caawimaada aad u baahan tahay si aad u sameyso waxyaabaha daruuriga ah ee nolosha ee aad u baahan tahay. Taas waxaa ka mid noqon kara waxyaabaha gacanta laga qabto, lagaa caawiyo xusuusta, ama in lagula joogo marka aad wax sameyneyso.

## Sidee ayey go'aan uga gaaraan haddii aan u baahanahay PCA?

Qiimeyntu waxa ay caawisaa in degmadu go'aan ka gaarto **haddii** lagu caawin karo imisa ayaase lagugu caawin karaa. Go'aanku waxa uu ku xiran yahay inta badan haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo hawl maalmeedka.

- In aad dharka xirato ama iska furto.
- Cidiyaha lagaa jaro, ilakaha laguu cadayo oo timaha laguu shanleeyo iyo waxyaabaha kale ee nadaafadda la xiriira.
- Qubeyska iyo isdhaqidda
- Cunidda iyo quudinta
- Kaa qaada fadhiga oo ku geeya sariirta.
- Socodka iyo tamashlaha
- Dhaqdhaqaaqa jirka iyo rogrogidda
- Isticmaalka suuliga

## Si wanaagsan ugu faahfaahi wax kasta

Waa muhim in aad wargeliso qofka qiimeynta sameynaya haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo waxyaabahaas oo dhan, ama haddii ay jiraan waqti maalinta ka mid ah oo aadan qabsan karin waxyaabahaas xaaladaada caafimaadka darteed.

La socodsii wax kasta oo aad uga sheegi karto baahidaada caafimaadka ama waxa aadan qabsan karin. Tusaale ahaan, waxa heli kartaa caawinaad badan oo PCA ah haddii xaaladaada caafimaadkaagu tahay mid daran sida dhaawac u baahan daryeel ama qalab gaar ah oo lagu neefsado, ama waxa aad heli kartaa caawinaad dheeraad ah oo PCA ah haddii aad dabeecadaha qaarkood leedahay.



Ku dadaal in aad u faahfaahiso isbedelkaas xaaladda caafimaadkaaga ka dib markii qiimeyntii ugu dambeysay la smeeyey iyo sida aad u maleyneyso in ay saameyn ugu yeelatay adeegga PCAga ee aad u tahay.

## In aad si wanaagsan u gudbiso baahidaada waa mid aad muhim u ah



Waxaa lagaa doonayaa in lagu fahmo si qiimeynta laguugu sameeyo. U sheeg qofka qiimeynta sameynaya haddii ay jiraan waxyaabo aadan fahmin ama aadadreemeyso in aadan fahmin.

Haddii aanu turjubaaka shaqadiisa si wanaagsan u qaban, u sheeg qofka sameynaya qiimeynta.

## Qiimeynta Ka Dib

- Nuqul ka mid ah qiimeynta PCA iyo adeegga 10 cisho gudahood. Mararka qaarkood waxaa lagu magacaabaa Doorashada Qiimeynta ee MN.

- Waxa kale oo laguu soo diri karaa "ogeysiis" ku saabsan go'aanka PCA. "Ogeysiiskan" waa waraaq laguu soo diro oo laguugu sheego in laguu ogolaaday PCA iyo inta laguu ogolaaday. Mararka qaarkood waxaa lagu magacaabaa "heshiiska shaqada" ama "ogolaasho" ama "diidmo."

## Maxaan yeelayaa haddii aanan ku raacsaneyn natiijada qiimenyta?

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka codsigaaga adeegga PCA, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Ogeysiiska waxaa la socda sida aad racfaan uga qaadan karto. Guud ahaan, way fududahay in aad ku guuleysato racfaanka haddii adeegga aad weydiisanayso laga yareeyey kii aad sanadkii hore horey u heli jirtay haddii aad weydiisaneyso in saacadaha laga kordhiyo kuwii aad horey u heystay.




Akhri xogta urursan ee *Racfaanka CFSS/PCA*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**